FREDRIKSTAD KOMMUNE

# Soo dhawoow adigoo kirayste ka ah guryaha Fredrikstad kommune

Macluumaad loogu talagalay dadka guryahayaga deggan



Virksomhet Bolig



# Soo dhawoow adigoo kirayste ka ah guri ay degmadu leedahay..

Buugyarehan waxaad adiga oo kiraysta guri ay degmadu leedahay ka heli doontaa macluumaad waxtar leh. Halkan waxaad ka heli doontaa inta badan waxa aad u baahan tahay inaad ka ogaato xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga, iyo waxa aan kaa filayno.

Fredrikstad kommune waxay leedahay oo ay kiraysaa qiyaastii 1000 guri. Sannad kasta qiyaastii 150 qof ayaa guri naga hela. Mararka qaarkood guryuhu waxay u baahdaan dayactir iyo hagaajin. Qaar ka mid ah arrimahaas adiga ayaa masuul ka ah, qaarna waxaa masuul ka ah **Virksomhet Bolig**. Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heli kartaa heshiiska kirada gurigaaga oo ay la socdaan xeerarka nidaamka guriga, iyo Xeerka Kirada Guryaha (Husleieloven). Sidoo kale waad nala soo xiriiri kartaa haddii aanad hubin waxa aad samaynayso. Waxaan kaa codsanaynaa inaad guriga ilaaliso, isla markaana aad ka qayb qaadato ilaalinta bey'adda xaafada muddada kiraysatay guriga.

**Waxaan rabnaa in dhammaan dadka guryahayaga deggan ay helaan guri ammaan ah oo wanaagsan.**

Salaan ka timid **Virksomhet Bolig**





# Tusmo

**6:** Yaad la xiriiraysaa?

**8:** U soo guurida

**11:** Kirada guriga

**12:** Isticmaalka iyo dayactirka guriga

**14:** Kala soocidda qashinka

**15:** Cusboonaysiinta heshiiska kirada

**16:** Joojinta heshiiska kirada

**17:** Macluumaadka xiriirka

# Yaad la xiriiraysaa?

Haddii aad dhawaan u soo guurtay guri degmo, waxaa hubaal ah inaad qabto su'aalo badan. Halkan waxaad ka helaysaa dulmar ku saabsan cidda aad kala xiriirayso Fredrikstad kommune.

## Virksomhet Bolig

Virksomhet Bolig waxay caawisaa dadka u baahan guri.

Waxaan ka shaqaynaa in qofka u baahan guri degmo uu helo hoy ammaan ah oo wanaagsan oo uu dego. Waxaad naga ka heli kartaa caawimo ku saabsan codsashada guri degmo ama deyn guri (*startlån*), iyo sidoo kale talo iyo hagid. Intaas waxaa dheer, annaga ayaa masuul ka ah maamulida iyo dayactirka guryaha kirada ah ee ay degmadu leedahay.

Sidoo kale waxaan masuul ka nahay qorshaynta guryo cusub, si degmadu u dabooli karto baahiyaha guryaha maanta iyo mustaqbalkaba.

## Avdeling Boligformidling

Avdeling Boligformidling waa qaybta gudoonta oo ka shaqaysa codsiyada guri degmo.

Inta badan guryaha degmada waa guryo ku-meelgaar ah, waxaana inta badan heshiisyada kirada guryuhu yihiin heshiisyo waqti xaddidan leh, oo muddada kiradu tahay saddex sano.

Haddii aad rabto inaad codsato kordhinta heshiiska kirada gurigaaga, waa inaad la xiriirtaa Qaybta Qaybinta Guryaha. Xaaladdaadu ma is beddeshay muddada kirada, tusaale ahaan ma heshay dhaqaale joogto ah? Markaas waxaa laga yaabaa in deyn guri (startlån) kaa caawin karto inaad iibsato guri kuu gaar ah. Qaybta Qaybinta Guryaha ayaa ka shaqaysa codsiyada ku saabsan deyn guri, sidoo kalena dadka u soo gudbisa guryaha kirada ah oo gaar ee laga helayo suuqa gurayaha kirada ah ee caadiga ah.

## Avdeling Boligforvaltning

Qaybta Maamulka Guryuhu waxay leedahay, maamushaa oo dayactirtaa qiyaastii 1000 guri degmo oo ku yaalla Fredrikstad kommune. Qaybta Maamulka Guryaha waa qaybta guriga ku tusaysa, heshiiska kula galaysa, isla markaana gudoonta dhammaan wixii xiriir ah ee ku saabsan gurigaaga.

<u>Maamule</u>

Maamulaha gurigu wuxuu masuul ka yahay inuu guriga u diyaariyo u soo guurida, iyo dib u la wareegidda guriga marka muddada kiradu dhammaato.

<u>Maamulaha heshiiska</u>

Maamulaha heshiiska kiradu wuxuu masuul ka yahay inuu guriga ku tuso oo uu heshiis kula galo. Maamulaha heshiiska kiradu wuxuu sidoo kale masuul ka yahay la socodka wixii xadgudub ah ee lagu sameeyo heshiiska kirada ama xeerarka nidaamka guriga inta uu heshiiska kiradu socdo.

### Shaqaalaha dayactirka iyo bey'adda guryaha

Shaqaalaha dayactirka gurigu (vaktmester) waxay masuul ka yihiin daba-galka arrimaha ku saabsan cilado iyo waxyaabo ka maqan/qaldan guriga inta uu heshiiska kiradu socdo.

Shaqaalaha bey'adda xaafadu (miljøvaktmesterne) waxay masuul ka yihiin kormeerka guryahayaga, sida ammaanka dabka, cabbirka radon-ka iyo ammaanka korontada, waxayna si joogto ah kormeer ugu tagaan dadka deggan guryaha. Sidoo kale waxay masuul ka yihiin hawlo la xiriira bey'adda xaafada, sida jaridda cawska, baraf-xaaqidda iyo cusbo/dhagax ku daadinta meelaha sibiibixda ah. Shaqaalaha bey'addu waxay sidoo kale kiraystayaasha ka caawiyaan hawlo kala duwan marka ay xaalado gaar ahi jiraan.



**Virksomhet Bolig**

# 69 30 60 00

**Telefoonka heeganka ah inta u dhexeysa 15.30 iyo 07.00 waa: 974 29 688**

**(kaliya xaaladaha degdegga ah sida koronto go’day xilliga qaboobaha ama biyo daatay).**

## NAV

Waxaad codsan kartaa kabka kirada (bostøtte) haddii uu hooseeyo dhaqaalaha soo gala dadka gurigaaga wada deggan isla markaana kharashaadka gurigu sarreeyo.
NAV-ta Fredrikstad ayaa gudoonta oo ka shaqaysa codsiyada kabka kirada. Waa in dhaqaalaha ku soo galaa ka hooseeyo xad sare oo go’an si aad u heli karto kabka kirada.

Lambarka telefoonka: 55 55 33 33

## Innbyggerdialog

La xiriir adeega Innbyggerdialog haddii aad qabto su’aalo ku saabsan adeegyada degmada.

Lambarka telefoonka: 69 30 60 00.

# U soo guurida

Hadda waxaa laguu soo bandhigay inaad kiraysato guri degmo. Waxaad la kulmaysaa maamule heshiis ka socda Qaybta Maamulka Guryaha marka aad guriga markii ugu horreysay soo arkayso. Marka daawashada guriga la dhammeeyo, waa inaad maamulaha heshiska u sheegtaa inaad aqbalayso ama diidayso guriga laguu soo bandhigay.



## Caymiska alaabta guriga

Waa inaad haysataa oo aad iibsataa caymiska alaabta guriga oo shaqaynaya dhammaan muddada aad guryahayaga deggan tahay. Waa inaad caymiska na tustaa ka hor inta aadan helin furayaasha guriga. Xusuusnow inaad diyaarsato caymiska alaabta guriga ka hor inta aadan iman kulanka lagu saxiixayo heshiiska. Haddii khasaare ku yimaado guriga, waxaad halis ugu jirtaa inaad iskaa bixixo kharash aad u badan, haddii aadan haysan caymiska alaabta guriga. Caymiskaagu wuxuu sidoo kale ku siinayaa guri ku-meelgaar ah haddii gurigaagu gubto ama dab wax ku yeelloobo.

## Heshiiska kirada guriga iyo xeerarka nidaamka guriga

Marka aad aqbasho guriga degmada ee lagu siiyay, waxaad ballan kulan la samaysanaysaa maamulaha heshiiska si aad u saxiixdo heshiiska kirada guriga. Kulankaas heshiiska, maamulaha heshiisku wuxuu kuu sharxayaa waajibaadka la socda guriga kirada ah, tusaale ahaan nadiifinta jaranjarada, jaridda cawska, hubinta qalabka digniinta qiiqa/dabka iwm. Waxaan sidoo kale isla eegaynaa waxa ku qoran heshiiska kirada guriga iyo xeerarka nidaamka guriga.

## Furayaasha

Marka heshiiska kirada guriga la saxiixo, waxaad helaysaa furayaasha guriga. Waa inaad si fiican u ilaalisaa furayaashaada. Haddii aad lumiso furayaashaa lagu galo meelaha la wadaago, waa inaad isla markiiba u sheegtaa Virksomhet Bolig. Furayaal cusub iyo furayaal dheeraad ah waxaad ka iibsan kartaa Virksomhet Bolig. Haddii aad bannaanka isku xirto ama aad lumiso furaha gurigaaga, waa inaad adigu dalbataa oo bixisaa kharashka farsamayaqaanka qufulka ee guriga kuu fuaraya. Nala socodsii haddii aad beddesho qufulka gurigaaga.

## TV yo internetka

Haddii aad rabto TV iyo internet, caadi ahaan waa inaad adigu dalbataa oo bixisaa kharashkooda. Haddii aad deggen tahay guryo iskaashato ah (borettslag), waxaa dhici karta in tani ku jirto kirada gurigaaga. La xiriir guddoomiyaha iskaashatada ama Virksomhet Bolig haddii aadan hubin. Haddii aad rabto inaad xirato anteeno (dhiish), waa inaad annaga naga codsataa oggolaansho ka hor inta aadan rakibin.

## Xayawaanka guriga lagu haysto

**Haddii aad rabto inaad haysato eey, bisad ama xayawaan kale oo guri lagu haysto, waa inaad codsataa oggolaansho. Foomka codsiga waxaad ka helaysaa boggayaga internetka.**

## Koronto iyo kululaynta guriga

Waa inaad soo gashato oo aad bixiso korontada guriga dhammaan muddada aad gurigayaga deggan tahay. Kiraystayaasha qaarkood waxay korontada iyo kululaynta guriga ugu jirtaa kirada guriga; hubi waxa ku qoran heshiiska kirada. Guriga waa in la kululeeyaa marka uu jiro qaboow keeni kara barafoobid. Tani waxay ka hortagaysaa in tuubooyinka biyaha iyo biyo-mareenku barafoobaan oo dillaacaan. Sidoo kale waa muhiim in gurigu yeesho kulayl joogto ah si looga hortago qoyaan iyo waxyeello qudhmid ah oo darbiyada ku dhaca. Haddii aad guurayso xilliga qaboobaha, waa inaad kulaylka u daysaa guriga muddada ka bixista heshiiska kirada. Waxaad yeelan kartaa masuuliyad magdhow haddii muddadaas ay waxyeello soo gaarto guriga sababtoo ah inaad damisay korontada.

## Ma rabtaa inaad wax ka beddesho gurigaaga?

Haddii aad rabto inaad wax ka beddesho gurigaaga, tusaale ahaan inaad rinjiyayso darbiyada, waa inaad annaga naga heshaa oggolaansho. Wax walba waa in loo sameeyaa qaab xirfad ahaan sax ah, kharashkana adiga ayaa bixinaya. Haddii aysan jirin meel loogu talagalay mashiinka weelka lagu dhaqo, waa in tuubbiiste ruqsad haysta uu kuu rakibaa. Foomka codsiga waxaad ka helaysaa boggayaga internetka.



## Sii-kiraynta iyo in dad kale guriga kula soo degaan

**Sii-kirayntu waxay ka dhigan tahay inaad gurigaaga ka sii kirayso qof kale (gacan-labaad). Ma oggolin sii-kirayntа guryahayaga. Tani waxay sidoo kale khusaysaa bogcada baabuurka la dhigto iyo qolalka kaydka. Ogow in jebinta qodobkan ay keeni karto joojinta heshiiska kirada, iyo inaad masuul ka tahay dhammaan arrimaha lagu sheegay heshiiska kirada/xeerarka nidaamka guriga, xitaa haddii aadan adigu guriga joogin. Taas oo macnaheedu yahay inaad masuul ka tahay in kirada guriga la bixiyo, iyo inaad leedahay masuuliyada magdhowga waxyeellada guriga soo gaarta.**

**Haddii aad rabto in qof kula soo dego gurigaaga, waa inaad marka hore soo codsataa. Tani waxay sidoo kale khusaysaa carruurtaada, xaaskaaga/ninkaaga ama qaraabo kale oo aan ka mid ahayn dadka guriga ku qoran markii heshiiska kirada guriga la qorayay. Foomka waxaad ka helaysaa boggayaga internetka.**

## Xeerarka nidaamka guriga

Xeerarka nidaamka gurigu waa qayb ka mid ah heshiiska kirada gurigaaga. Jebinta xeerarka nidaamka gurigu waxay mararka qaar keeni kartaa in lagaa saaro guriga. Halkan waxaa ku qoran qodobo muhiim ah oo ku saabsan waxa adiga lagaa filayo, iyo waxa aad ka filan karto deriskaaga.

- Degganaan gudaha iyo bannaanka guriga inta u dhexeysa saacadaha 23 iyo 07 (guryaha iskaashatada ah waxay leeyihiin xeerar u gaar ah)
- Nadiifinta iyo hagaajinta gudaha iyo bannaanka guriga
- Ka qayb qaado in la helo bey'ad xaafad oo wanaagsan
- Adiga iyo martidaadu waa inaad u dhaqantaan si tixgelin iyo ixtiraam leh
- Sanaadiiq, alaab guri, TV, talaajad iwm. lama dhigi karo bannaanka guriga. Alaabta annaga noola muuqata qashin waa la qaadi doonaa oo la tuuri doonaa, kharashkana waxaa bixinaya mulkiilaha alaabta
- Baabuurta waxaa la dhigi karaa oo keliya meelaha loogu talagalay baabuur-dhigashada

## Cabasho deris

Haddii aad rabto inaad gudbiso ka cabasho deris, waa inaad taas u soo gudbiso qoraal ahaan, waxaana fiican inaad isticmaasho foomkayaga oo aad ka helayso boggayaga internetka.

# Kirada guriga

## Waa meeqa kirada guriyaha degmadu?

Kirada guryaha Fredrikstad kommune waa kiro u dhiganta heerka caadiga ah ee suuqa. Kirada noocan ah waxay ku salaysan tahay baaritaanno lagu sameeyo suuqa kirada iyo heerka tayada guriga. Heerka kirada guriga waxaa sannad kasta loo beddelaa heer wafaaqsan cabbirka korodhka qiimaha guud.

### Bixinta kirada guriga

- Bixinta kirada guriga waxay ku eg tahay maalinta 20-aad ee bil kasta, waana inaad waqtigeeda ku bixisaa.
- Haddii aad lacagta bixiso goor dambe, waxaa kugu soo kordhaya khidmad dheeraad ah iyo dulsaar.
- Haddii aadan helin warqadda bixinta kirada guriga ka hor maalinta 10-aad ee ka horreysa xillga bixinta kiradu ku eg tahay, waa inaad nala soo xiriirtaa.
- Waxaad geli kartaa heshiis AvtaleGiro ama e-faktura ah; bangigaaga ayaa arrintan kaa caawin kara.

### Maxaa dhacaya haddii aadan bixin?

- Waxaan kuu soo diraynaa xusuusin lacag-bixin oo ay la socoto khidmad dheeraad ah 15–20 maalmood kadib marka waqtigii bixinta kirada guriga la dhaafay.
- Haddii aadan bixin lacagta kadib xasuusinta muddo 3 toddobaad gudahood ah, waxaa laguu soo dirayaa ogeysiis ah in guriga lagaa saari doono.
- Waxaad NAV ka heli kartaa talo-bixin dhaqaale.

La xiriir sida ugu dhakhsaha badan, telefoon: 55 55 33 33.

### Kabka kirada/guriga

Fredrikstad kommune iyo Husbanken (Baanka Guryaha) waxay leeyihiin nidaamyo taageero ah oo loogu talagalay dadka ama dadka guriga wada deggan ee dhaqaalaha soo gala hooseeyo isla markaana kharashaadka gurigu sarreeyo. NAV-ta Fredrikstad ayaa qaabbisha oo ka shaqaysa codsiyada kabka kirada/guriga (bostøtte). La xiriir NAV haddii aad arrintan su’aalo ka qabto, telefoon: 55 55 33 33.



# Isticmaalka iyo dayactirka guriga

## Dayactirka gudaha guriga – masuuliyaddaada

Marka aad u soo guurto guriga, waa muhiim inaad noo sheegto xilliga guriga lagu tusayo, ama muddo gaaban gudaheed kadib markaad soo guurto, haddii ay jiraan waxyaabo guriga ka mid ah oo aan hagaagsanayn. Inta aad guryahayaga deggan tahay, adiga ayaa masuul ka ah dayactirka gudaha guriga. Guriga waxaad kula wareegaysaa xaaladda uu ku sugan yahay, marka aad ka guuraysana waa inuu ahaadaa xaaladdii uu ku sugnaa markii aad soo degtay. Waxaan kaa codsanaynaa inaad guriga ilaaliso inta aad guryahayaga deggan tahay, iyo inaad hubiso inuusan gurigu ku waxyeelloobin isticmaal khaldan. Mararka qaarkood waan ku soo booqan doonnaa. Waxaan u imanaynaa inaan guriga eegno, iyo inaan samayno kormeer farsamo oo ammaanka dabka ah. Ogeysiis ayaan waqti fiican ka hor kuu soo diri doonnaa, laakiin waa inaad noo oggolaataa inaan gudaha soo galno.

## Bey'adda xaafada iyo meelaha la wadaago

Haddii aad leedahay beer ama qayb yar oo beer ah, adiga ayaa masuul ka ah jaridda cawska, baraf-xaaqidda iyo cusbo/dhagax ku daadinta meelaha guriga ka tirsan. Sidoo kale waxaad masuul ka tahay nadiifinta jaranjarada ama hawlaha iskaa wax u qabso ah oo dadka xaafada deggan ka qayb qaataan, haddii ay yihiin hawlo ay tahay inay qabtaan dadka deggan guryaha iskaashatada ah ama gaarka loo kala leeyahay ee aad deggen tahay. Haddii ay kugu adkaato inaad gudato waajibaadkaaga, waa inaad nala soo xiriirtaa.

## Layrin iyo hawo-qaadid

Gurigaagu waa inuu leeyahay nidaamka hawo-qaadidda ama dhowr dalool oo layrin ah oo suurtagelinaya in hawo cusub ay soo gasho kana baxdo guriga. Haddii gurigu lahayn kuwan, waa inaad nala soo xiriirtaa. Waa muhiim in daloollada hawo-qaadiddu furnaadaan, si looga hortago fangas iyo waxyeello qudhun ah, kuwaas oo waxyeello u leh adiga iyo gurigaba.

## Ammaanka dabka - ka hortagista dabka

Dhammaan guryahayagu waa inay leeyihiin qalabka digniinta qiiqa, qalabka dab-demiska iyo/ama tuubada dab-demiska. Sidoo kale adiga ayaa masuul ka ah inaad hubiso in qalabkani gurigaaga yaallo, iyo inuu hagaagsan yahay oo shaqaynayo. Waa inaad hubisaa inaad beddesho baytariga qalabka digniinta qiiqa marka loo baahdo, ugu yaraan hal mar sannadkii. Sidoo kale waa inaad si joogto ah u tijaabisaa in qalabka digniinta qiiqu shaqaynayo, adigoo riixaya badhanka tijaabada. Qalabka dab-demisku waa inuu leeyahay taariikh ku shaabbadaysan, waxaana guud ahaan qalabka la hubiyaa 5-tii sanoba mar, lana beddelaa 10-kii sanoba mar. Fallaarta cabbiraha cadaadisku ee waa inay ku jeeddaa qaybta cagaaran.

**Waddooyinka badbaadada ee laga bixi karo**. Aad bay muhiim u tahay in la hubiyo inaan wax alaab ah la dhigin waddooyinka badbaadada ee laga baxo. Tani waxay sidoo kale khusaysaa baskiil-cageedka korontada ku shaqeeya ee lagu cabaynayo/dabaynayo gudaha. Sigaar ku cabbidda sariirta dusheeda ayaa ka mid ah sababaha inta ugu badan keena ku dhimashada dabka, mana bannaana in sigaar lagu cabbo gudaha guryahayaga. Waa inaad si joogto ah u nadiifisaa shaandhada hawo-qaadada jikada; shaandhooyin wasakh ah waxay noqon karaan halis dab. Iska ilaali isticmaalka fiilooyinka qaybisada ah; haddii aad u baahan tahay soket dab oo dheeraad ah, waa inaad nala soo xiriirtaa.

## Hawo-qaadaha jikada

Waa inaad nadiifisaa shaandhada hawo-qaadaha jikada hal mar bishii. Dufanka ku dhega kadib cunto karinta wuxuu noqon karaa halis dab.

## Nadaafad

Waxaan kugula talinaynaa inaad si joogto ah u isticmaasho huufar oo aad u dhaqdo guriga; taasi waxay u fiican tahay hawada iyo bey'adda gudaha guriga iyo gurigaba. Daloollada biyo-mareenka iyo biyo-mareennada jikada iyo musqusha waa in si joogto ah loo nadiifiyaa, sababtoo ah si fudud ayay u xirmaan. Waxaan kugula talinaynaa inaad nadiifiso daloollada biyo-mareenka afar jeer sannadkii.

# Isticmaalka iyo dayactirka guriga

## Dayactirka bannaanka guriga – masuuliyaddayada

Virksomhet Bolig ayaa masuul ka ah dayactirka meelaha la wadaago, oogada dibadda ee dhismayaasha, qalabka iyo nidaamyada farsamo sida wiishashka, hawo-qaadidda iwm., iyo nidaamka digniinta dabka.

Haddii aad aragto waxyaabo maqan ama dhaawacyo aad u malaynayso in annagu masuul ka nahay hagaajinteeda, waa inaad arrintaas noo sheegtaa. Waxa fiican in aad qoraal ahaan noogu soo gudbiso, laakiin haddii ay tahay arrin degdeg ah, waxaad naga soo wici kartaa telefoonka 69 30 60 00.

Xaaladaha degdegga ah sida biyo daatay iyo koronto go'day xilliga qaboobaha, oo dhaca inta u dhexeysa 15.30 iyo 07.00, waxaad wici kartaa telefoonka heeganka ah: 974 29 688.

Foomka lagu soo sheego waxyeello, baahi dayactir ama waxyaabo ka maqan/qaldan guriga, waxaad ka helaysaa boggayaga internetka:

## Cayayaan iyo xayawaan waxyeello leh

Ma rabno in guryahayaga ay ku jiraan cayayaan ama xayawaan waxyeello leh, sababtoo ah adiga ayay dhib kugu yihiin, waxayna burburin karaan guryaha. Waa inaad noo soo sheegtaa haddii aad aragto cayayaan ama xayawaan waxyeello leh sida dooli, jiir, baranbaro iwm. oo jooga gudaha gurigaaga ama meelaha la wadaago. Annaga ayaa qabanqaabinayna nadiifinta iyo ka saaridda cayayaanka/xayawaanka waxyeellada leh, waana muhiim inaad gudaha u oggolaato dadka ka saaraya.



# Kala soocidda qashinka

Markaad tahay kirayste deggen guryahayaga, waa inaad qashinka kala soocdo. Waana in aad taas sameysid adigoo raacaya tilmaamaha hadda ka jira Fredrikstad kommune.

**Qashinka cuntada:**
Haanta qashinka cuntada waxaa lagu ridi karaa oo keliya qashin dabiici ah oo qudhmi kara, taas oo ah cunto aan mar dambe la cuni karin. Ka hor inta aadan cunto tuurin, waa inaad eegtaa, urisaa oo dhadhamisaa si aad u hubiso in cuntada weli la cuni karo iyo in kale. Ogow, cuntadu qasab ma aha inay xumaatay xitaa haddii taariikhda dhicitaanka la dhaafay.

**Warqad iyo kartoon:**
Warqadda, kartoonka iyo kartoonka baakadaha ee lagu ridayo haanta warqadaha waa inay nadiif yihiin. Warqad, kartoon iyo kartoon baakadeed oo wasakhoobay waa in lagu ridaa haanta qashinka haraaga ah. Warqadda si toos ah ayaa loogu ridayaa haanta warqadaha, ama waxaa lagu ridayaa bac warqad ka samaysan, balse laguma ridayo bac caag ah. Warqadda hadiyadaha kirismaska iyo warqadaha kale oo hadiyadaha ee dhalaalaya waa qashin haraa ah, lagumana ridayo haanta warqadaha.

**Qashinka caagga ah:**
Baakadaha caagga ah waa in lagu ridaa bacaha caagga ah ee la iska dhex arki karo. Waxay noqon karaan tusaale ahaan xaashi caag ah, bacaha caagga ah, sanduuqyo caag ah sida sanduuqyada jalaatada, koobab caag ah sida kuwa yoogadhka, subagga iwm., dhalooyin caag ah iyo wixii la mid ah.

**Dhalo iyo bir:**
Dhalooyinka iyo birta ee cunto ama cabitaan ku jireen, iyagoo madhan oo la nadiifiyay ayaa lagu ridayaa haanta gaarka ah ee dhalada iyo birta. Waa in si toos ah loogu rido haanta, oo laguma ridayo bacaha caagga ah.

**Suuf, dhar iyo kabo:**
Waxaad dharka, kabaha, boorsooyinja, suunka, daahyada, go'yaasha sariirta, maro-miiska iyo tuwaallada ku ridi kartaa bac xiran, kadibna waxaad geyn kartaa goobaha dib-u-celinta ee yaalla meelo badan oo degmada ah. Ogow in bacda aan la dhigin bannaanka sanduuqa ururinta.

**Qashinka elektaroonigga ah (EE-avfall):**
Qashinka elektaroonigga ah waxaa la geyn karaa Øra (FREVAR). Guryaha (shacabka) lacag la'aan ayay ku geyn karaan. Tani waxay khusaysaa tusaale ahaan: mashiinka kafeega, TV, mashiinnada garka lagu xiiro, kombiyuutarro, nalalka iyo guluubka nalka ee tuubada ah, alaabta carruurtu ku ciyaarto ee baytari ku shaqaysa, burushyada ilkaha ama qalabka farsamada iwm.

**Tømmekalender**



# Cusboonaysiinta heshiiska kirada

Waxaad guryahayaga degganaan kartaa oo keliya inta aad haysato heshiis kiro oo shaqaynaya. Haddii aad rabto inaad codsato kordhinta heshiiska, waa inaad nala soo xiriirtaa si aan mar kale u qiimeyno xaaladdaada.

Xusuusnow inaad nala soo xiriirto waqti fiican ka hor xilliga heshiiskaagu dhammaanayo. Waxaad soo diri kartaa foom codsi ama waxaad wici kartaa 69 30 60 00.

Foomka codsiga cusboonaysiinta heshiiska kirada waxaad ka helaysaa boggayaga internetka:

Ka hor inta aan la gelin heshiis cusub oo kiro, waxaa lagugu yeeri doonaa kulan qiimeyn ah, si aan u qiimeyno inaad weli ka tirsan tahay dadka loogu talagalay guriga. Intaas waxaa dheer, maamule guri ayaa gurigaaga kuugu iman doona kormeer, si loo hubiyo in gurigu xaalad wanaagsan ku sugan yahay, loogana jawaabo wixii su'aalo ah ee aad ka qabto guriga.

Haddii laguu oggolaado cusboonaysiinta heshiiska kirada, waxaa laguugu yeeri doonaa kulanka saxeexa heshiiska, ama waxaa laguu soo diri doonaa heshiis cusub oo aad si elektaroonig ah u saxiixdo.



# Joojinta heshiiska kirada

Haddii aadan rabin inaad kordhiso heshiiska kirada, waa inaad guriga ka guurtaa ugu dambayn taariikhda ku qoran heshiiska.

Haddii heshiiskaagu uusan lahayn taariikh dhammaad ah, ama aad rabto inaad ka guurto ka hor inta heshiisku dhammaanayo, waa inaad noo soo dirtaa joojin heshiis oo qoraal ah. Muddada ogeysiiska joojinta heshiiska waxaad ka helaysaa heshiiska kirada. Haddii uu qofku geeriyoodo, waxaan ehelka ka codsanaynaa inay buuxiyaan foomka joojinta heshiiska. Foomka joojinta heshiiska kirada waxaad ka helaysaa boggayaga internetka:

Waa inaad si fiican u nadiifisaa oo aad ka qaaddaa dhammaan alaabtaada guriga iyo qolalka kaydka kuu yaalla. Marka laga reebo duugowga caadiga ah, gurigu waa inuu ahaadaa xaaladdii uu ku sugnaa markii aad u soo guurtay. Waxaad annaga nala samaysanaysaa ballan ku saabsan wareejinta guriga. Waxaan kuugu imanaynaa guriga si aan u hubino nadiifinta iyo hagaajinta, u akhrino mitirka korontada, lana wareegno furayaasha.



# Macluumaadka xiriirka

Virksomhet Bolig
Postboks 1405
1602 Fredrikstad

bolig@fredrikstad.kommune.no
postmottak@fredrikstad.kommune.no
www.fredrikstad.kommune.no

**Cinwaanka booqashada:**
Bryggeriveien 2-4, 1603 Fredrikstad
FG: *Waa inaad ballan haysataa si aad noola kulanto.*

**Telefoonka maalmaha shaqada:** 69 30 60 00

**Telefoonka heeganka fiidkii/dhammaadka toddobaadka/maalmaha fasaxa ciidaha:** 974 29 688
*FG! Kaliya xaaladaha degdegga ah*

FREDRIKSTAD KOMMUNE

Virksomhet Bolig